

SHARCI Lamb. 15 ee 6 Abriil 1960

DHISMAHA CIIDANKA QARANKA EE SOMALIYA

MAAMULAHA GUUD

KADIB markii laga baarandegey ansixidda Golaha Sharci Dejinta.

WAXAA LA AMRAY LANA SOO SAARAY

Qod. 1

Waxaa la dhisay Ciidanka Qaranka Somaliyeed.

Waxaa la gudoonsiyey wajiibka difaaca hubeysan ee Dalka.

Qod. 2

Ciidanka guurta aha ee Ciidaanka Booliska ayaa noqonaayo qolada ugu horeeysa ee Ciidanka Qaranka ee Somaliya, sidas awgeedna waxaa laga soo fujiyey ciidaanka Booliska oo ay horay uga tirsaneyd.

Qaybta ciidanka circa oo hadda ka tirsanaa maamulka ciidanka Booliska waxaa la wareegi doono maamulka Ciidanka Qaranka.

Qod. 3

Ciidanka Qaranka Somaliyeed wuxuu hoos imaanaya Wasiirka Difaaca Ilaa iyo intii la dhisi doono Wasaaradaasi, Ciidanka Qaranka wuxuu hoos tegi doona Guddoonka Golaha.

Qod. 4

Dowladda ayaa soo saari doonto shuruucda lagu nidaamin doono Ciidanka.

Qod. 5

Sharcigaani wuxuu hirgeli doona maalinta lagu qoron Faafinta Rasmiga ee Somaliya.

Sharcigaani waxaa lagu qori doona Keydka Rasmiga ee Shuruucda waxaana lagu faafin doona Faafinta Rasmiga ah. Waxaa la faraaaya cid kasto in sharcigaan laoo hoggansanaado, dadka loo hoggaamiyo.

Muqdishu, 6 Abriil 1960.

Maamulaha Guud
Mario di Stefano

Raa'isul Wasiirka
Abdullahi Issa Mohamud

Wasiirka Arrimaha Gudaha
Abdullahi Issa Mohamud

Wasiirka Maaliyadda
Osman Ahmed Roble